AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Gurisiinta

Akharinta Fudud





Qofka garwadeenkaaga ama proposerkaaga ayaa hoy kuu diyaarin doona aad degto markaad Australia timaado.



Hoygaaga bilowga hore wuxuu noqon karaa gurigaaga muddo gaaban.



Waa inaad raadsataa hoyga muddada dheer ama joogtada ah – meel aad ku noolaan doonto muddo dheer.




Waxaad u baahan tahay inaad arinta ku dhaqaaqdo 6da bilood ee ugu horreeya halkan Australia.

Meel ad ku noolaato waxaad ka heli kartaa:



- haya'daha wakiilada milkiilayaasha




- garwadeenkaaga



- qofkii ku isboonsaray





- Saaxiibadaada

# Noocyaha Guryaha



Halkan Australia waxaa ka jira noocyo kala duwan oo guryo ah.

Magaalooyinka waaweyn dadku waxay ku nool yihiin:



- dhismayasha abaartimantiyada dhaadheer



- guryo waaweyn oo townhouses ah

Xaafadaha dadku waxay ku nool yihiin:



- guryo yaryar



- guryo waaweyn



- guryo yunidyo ah oo aad isugu dhow



Magaalooyinka miyiga dadku waxay ku nool yihiin:

- guryaha faamka ah



- mundulada

Guryaha Australia badanaa waxay leeyihiin:



- jikada



- qolka fadhiga



- loondariga



- qolalka jiifka



- qolka qubayska



Qolka qubayska wuxuu leeyahay shawaarka. Qolalka qubayska qaarkood waxay leeyihiin bathtubka.



Musqushu waxay:

- ku ooli kartaa qolka qubayska



- ama waa qol yar ka baxsan qolka-qubayska.

# Kireysiga



Lacag-ka-bixinta si aad ugu noolaato guri ay leedahay cid kale waxaa loo yaqaan kireysiga.




Waxaad u baahan tahay inaad kireysato meesha aad doonayso inaad ku noolaato.



Waxaad ku bixin kartaa lacagta kiradaada:

- dakhligaaga – lacagta aad ka shaqaysey shaqadaada




- lacagta aad ka hesho Centrelink




Waxay ku kacaysaa qarash badan si looga kireysto guri magaalooyinka waawey halkan Australia.

Noocyada iyo baaxadda guryaha aad ku noolaanayso way kala duwan yihiin hadba ayadoo ku xiran:



- magaalada aad ku nooshahay



- qaybta magaalada aad doonayso inaad ku noolaato



- imisa ayaad awoodaa inaad bixiso



Way qarash yartay inaad ku noolaato:

- xaafadaha – goobaha dibadda ee magalooyinka
- magaalooyinka yaryar ee gobolada

Guryahuna way ka sii waynaan karaa.

Si aad u kireysato meel aad ku noolaato waa inaad:




- saxiixdaa heshiiska




- bixisaa lacagta dhigaalka kireysiga




- bixisaa 1 bisha lacagta kirada

## Saxiixidda heshiiska kireysiga




Heshiiska kireysigu waa dokumanti sharciyeed ama heshiis u dhaxeeya:

- adiga – oo kireystaha ah
- milkiilaha guriga – oo ah milkiilaha guriga




Heshiisku wuxuu ilaalinayaa adiga iyo milkiilaha guriga.

Waxay sharxaysaa:



- Intee lacagta kirada ah ayaad u baahan tahay inaad bixiso




- badanaa ilaa intee ayaad ku bixinaysaa lacag kirada



- ilaa intee ayaad halkaas ku noolaanaysaa





- kumaa bixinaya biilasha adeegyada sida
  - Biyaha
  - korontada
  - gaaska
  - Taleefanka

## Bixinta lacagta dhigaalka kirada




Markii aad saxiixdo heshiiska kirada, waxaad kaloo u baahan tahay inaad bixiso lacagta dhigaalka kirada.




Lacagta dhigaalka kirada wa ah al-mar lacag-bixin ah. Waxay la mid tahay 4 asbuuc kiradood.



Waxay daboolaysaa haddii aad:

- waxyeellayso ama jebiso walxaha




- ka guurto kahor taariikhda kireysiga




Waxaad dib u heli doontaa lacagta dhigaalka kirada haddii:

- wax kasta uu yahay ok markii aad ka guurto
- aadan waxyeellayn ama aadan jebin wax guriga ah
- aadan jebin xeerarkii heshiiska kireysiga



Waxaad caawimaad u heli kartaa si aad u bixiso lacagta dhigaalka kirada.





Waxaad talooyinka ka helaysaa:

- garwadeenkaaga




- adeegyada hoyga




Waxaad u baahan tahay inaad ku bixiso waqtigooda lacagta kiradaada iyo biilasha adeegyada aad isticmaasho.



Haddii aadan waqtigeeda ku bixin lacagta kiradaada, waa lagaa bixinayaa – laguu sheegaya inaad ka guurto guriga.



Haddii aadan waqtigoodii ku bixin biilashaada, adeegyada aad isticmaasho ayaa lagaa jarayaa.

## Ku-noolaanshaha gurigaaga



Milkiilaha guriga wuxuu xaq u leeyahay inuu soo booqdo oo kormeero guriga aad ka kireysatey.



Milkiiluhu waa inuu kuu sheegaa markay arintaas dhacayso.



Milkiiluhu wuxuu kormeerayaa inuu eego haddii:

- aad guriga iyo jardiinka ka dhigayso kuwo nadiif ah oo habaysan



- aysan jirin wax waxyeello ah



Haddii aadan ilaalin guriga aad kireysatey oo aadan ka dhigin mid quruxsan oo nadiif ah:

- deriskaagu way kaa caban karaan



- milkiiluhu wuu kaa bixin kara guriga

## Waxyaalaha kireyste ahaan aad u baahan tahay inaad samayso



Ku-bixi lacagta kiradaada waqtigeeda.



Daryeel iska-saar gurigaaga.



U-sheeg milkiilaha haddii aad waxyeello ama jebin ah gaysatey.



Haddii aad doonayso inaad isbaddalo ku samayso gurigaaga waxaad u baahan tahay inaad ka codsato marka hore milkiilaha.

Wuu kuu sheegaya haddii ay ok tahay.




Haddii aad qorshaysato inaad guurto, waxaad u baahan tahay inaad milkiilaha u sheegto 4 asbuuc kahor.




Heshiiska kiradaada ayaa kuu sheegi doona inta kireyste oo guriga ku noolaan karta.

Qolalka haga kirayn dad badan ama booqdeyal kuwaas oo sii joogaya muddo dheer.



Ka feker wixii derisyadaada ah iyo waxaad samaynaysaan sida u saamayn karaan.




Hayso diiwaanada – risiidhada iyo wixii dokumantiyo kale ah – oo la xiriira guriga aad kireysatey haddiiba ay dhacdo wax dhibaato ah.




Iska bixi wixii lacag dheeraad ah oo taagan haddii aad guurto kahor intuusan dhammaan heshiiska kiradu.

# Waxyaalaha milkiiluhu ay tahay inuu sameeyo




Waa inuu ku siiyaa digniin badan haddii uu doonayo inuu wax ka baddelo lacagta kirada aad bixinayso.



Waa inuu ku siiyaa digniin badan haddii uu doonayo inuu kaa saaro guriga – inuu kaa bixiyo guriga.



Inuu sameeyo waxyaallaha aan si quman u shaqaynayn adoon sugin muddo dheer.





Inuu dib u bixiyo lacagta dhigaalka haddii wax walbaa sax ku yihiin marka la raaco heshiiska kirada.

# Ammaanka




Mar kasta xidh:

- albaabada
- daaqadaha



Mar kasta kuukarkaaga dami markii aadan waxba ku karsanayn.



Hubi in alaarmiyadaada qiiqa ay shaqaynayaan.
Ku rid batariyo cusub si joogto ah – 6dii bilood ee kasta.

# Liiska-hubinta gurisiinta




Isticmaal liiska-hubintan si aad u hubiso inaad leedahay waayo-aragnimo lacagta kirada oo wacan.




Ogsoonow meesha aad ku nooshahay iyo waxaad ka heli karto meelaha u dhow gurigaaga, oo ay ka midka yihiin:

- dugsiyada



- gaadiidka




- dukaamada




Ogsoonow inta uu le'egyahay heshiiska kiradaada iyo markuu dhammaanayo.



Ogsoonow wax kasta oo ku saabsan bixinta lacagta kiradaada:


- intay le’gtahay




- siday badanaa tahay




- marka waqtigeeda la joogo




Ogsoonow intay le’gtahay lacagta dhigaalka kiradaada ay kuugu kacayso.


Lacagta dhigaalka kirada wuxuu badanaa le’egyahay 4 asbuuc kiradooda.




Ogsoonow haddii ay tahay inaad bixiso lacag dheeraad ah haddii aad doonayso inaad guurto ka hor intuusan dhammaan heshiiska kiradu.



Ogsoonow waxay tahay in kireystaha iyo milkiiluhu ay sameeyaan.



Hel adeegyada aad u baahan tahay in lagu xiro:

- biyaha
- korontada
- gaaska
- taleefanka



Ka taxadar oo isha ku hay waxay carruurtaadu samaynayaan.



Ilaali wixii xayawaan ah oo aad leedahay.



Ka dhig gurigaaga iyo jardiinka kuwo qurxoon oo nadiif ah.



Sharqanta ka dhig mid hoosaysa taas oo aan arbushayn derisyadaada.

Ku rid qashinka biinanka qashinka.



Ku rid waxyaalaha dib loo farsamayn karo biinanka dib-u-farsamaynta:

- xaashiyaha iyo garbadyada
- dhalooyinka
- balaastiga

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM